

BARNAAMIJYO LOOGU TALAGALEY CARUURTA XANAANADA OO LA SOCDA WAXBARASHADA WAALIDKA/KA QEYBQAADASHADA WAALIDKA

WAXBARASHADA QOYSASKA EE CARUURNIMADA HORE (ECFE)
952/928-6763/928-6782

- . Fasalada waxay leeyihiin saddex qeybood oo kula duwan: firfircoonida waalidka/cunuga; firfircoonida caruurta; waxbarashada waalidka.
- . Fasalada ugu horeyntii waxaa loo habeeyey ayadoo loo fiirinaayo da'da caruurta: ilmaha, 1 sano jir, 2,3,4, sano jir ama da' isku jir ah (2-5)
- . Xanaanada PALS waxaa ka mid ah Waxbarashada Qoysaska ee Caruurnimada Hore (ECFE) oo kala duman oo lagu darey hal ama laba cunug maalmaha oo keliya; PALS + xanaanada iskuulka ka hor waxay hormarinayaan caruurta iyo kuwa leh baahida gaarka ah leh.
- . Cayaarta Wriggle and Roll waa subaxyada sabtida 10-11:30 da'da u dhaxaysa 1-5 oo la socda dad waaweyn.
- . Dhacdooyin gaar ah oo uu soo habeeyo golaha la talinta.
- . Waxaa la bixiyaa sanadka gudihisa fursado waxbarasho oo fasalo hal mar ah oo loogu tala galey qoysaska.
- . Waxaa la bixiyaa sanadka gudihisa fasalo shan isbuuc ah oo loogu tala galey qoysaska leh ilmo da'dooda u dhaxeeyso 0-6 bilood.
- . Masaariif la yareeyey ama la cafiyey oo miisaaman ayaa la heli karaa.
- . Fasalada waxaa lagu qabanayaa Central ama Aquila Primary Center(PALS) subaxyadii, galbihii iyo maqarabyadii(ugu horeynta ilmaha yar yar iyo kuwa 1aad)
- . Khadka telefoonka oo kulmiya qoysaska si loo codsado telefoon ama qof ahaan wada hadal xor ah, qarsoodi ah oo lala yeelanayo baraha waalidka/macalinka caruurta oo ku saabsan waxa waalidka si khaas ah uu u daneynaayo.

DIYAARINTA ISKUULKA: DIYAARIN, MEELAYN, XANAANAD (RSK)
952/928-6763

- . Fasalada waxaa loogu talagaley caruurta da'doodu u dhaxaeyso 3,4,5 kuwaasoo soo marey iskuulka xanaanada mudo yar ama aan soo marinba ama aan lahayn khibrada kooxda daryeelka caruurta.
- . Ka qeybqaadashada waalidka waa muhiim waxaana looga baahan yahay firfircooni kala duwan oo farabadan.
- . Qoysaska codsada barnaamijka qadada qiimaha jaban ama bilaashka lagu dhiibo ee federaaliga ah. Haddii aysan xaq u lahayn barnaamijkaan qarash bilwalba ah ayaa lagu dalici doonaa. Inta badan qoysaska RSK(Diyaarinta, Meelaynta iyo Xanaanada) waxay u qalmaan barnaamijkaan qadada qiimaha jaban ama bilaashka ah. Sidoo kale qiimo la yareeyo ama la cafiyo ayaa la heli karaa.
- . Caruurta waxaa la siin doonaa gaadiid bilaash ah oo lagu geeyo iskuulka laguna soo celiyo.
- . Fasalada loogu talagaley 3 sano jirka waxaa la qabtaa subaxnimada Talaadada/Khामीiska; Kuwa loogu talagaley 4-5 sano jirka waxaa la qabtaa galabnimada Isniinta/Talaadada/Khामीiska, subaxnimada Isniinta/Arbacada/Jimcaha, galabnimada Isniinta/Talaadada/Arbacada/Khामीista oo lagu qaban doono Central-ka.

WAXBARSHADA QOYSKA (FAR BARASHADA QOYSKA)
952/928-6763

- . Fasalada waxay ka kooban yihiin 4 qeybood: Fasalada ESL-ka ama ABE/GED-ga oo loogu talagaley waalidiinta; firfircoonida waalidka-cunuga; firfircoonida caruurta; waxbarashada waalidka.
- . Caruurta waxay xaadiriyaan fasaladooda inta waalidka ay dhiganayaan fasaladooda; isbuucii laba jeer qoysasku waxay leeyihiin firfircoonida waalidka-cunuga; laba miilin oo kalena waxay leeyihiin waxbarasho loogu talagaley waalidka, waqtigaas oo caruurta lagu heyn doono fasalkooda.
- . Qoysaska waxaa la siin doonaa gaadiid bilaash ah oo u qaada iskuulka kana soo celiya. Waxayna codsanayaan barnaamijka qadada qiimaha jaban ama la yareeyey ee faderaaliga ah.
- . Fasalada waxaa la qabtaa maalmaha Isniinta ilaa Khामीista 9-2:00 iyo Jimcaha 9-12, bisha Siteembar ilaa iyo Juulaay.
- . Waalidiinta waxaa laga doonayaa in ay soo qabanqaabiyaa iskuul dhigashadooda ayagoo **ugu horeyntii** kala soo xiriiraya Ann Gilbert qeybta Kala doorashada Dadka waa weyn ee Waxbarashada, 952/988-5346.

Wixii su'aalo/macluumaad ah kala xiriir Mary O'Brien, Isuduwaha Adeegyada Qoysaska, 952/928-6763